UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 42 – 24 October, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Dhimashadii toddodaakan la soo gudnoonaatay labo qof oo ka mid ahaa shaqaalaha Qaramada Midoobay, ayaa murugo qoto-dheeer ku abuurtay hawlwadeenka beesha gargaarka bini'aadminnimada ee Soomaaliya. Abdinasir Aden Muse, oo ka mid ahaa Saaraakiisha Barnaamijka Cuntada Aduunka (WFP), ayaa toogasho lagu dilay isagoo ka soo baxay saalaaddii Maqrib, 17kii oktoobar, magaalada Marka ee Gobolka shabeelaha hoose. Dhacdadani waxay ku soo beegantay xilli raashin gargaar ah oo gaarayo ilaa 35,000 metric tons la garsiinayey ilaa 3 million qof bishiiba dhamaan dalka oo dhan. Labo cisho kaddib, 19kii Oktober, waxaa dabley aan la garanayn ku dileen degmada Xudur ee gobolka bakool, Muqtar Mohamed Hassan oo ahaa Injineer, madax ka ahaa Barnaamijka Biyaha iyo Faya-dhawrka ee hay'adda UNICEF; iyadoo mashaariicda dhinaca biyaha iyo faya-dhawrku ay aad muhad gaar ah u leeyihiin dalka, taasoo qiyaas boqolkiiba 29% ay dadweynahu fursad u helaan biyaha nadiifka ah ee la cabo, tiro dhan boqolkiiba 37% ay iyaguna fursad u helaan adeegyada faya-dhawrka.

Dilalka toddobaadkan dhacay, ayaa waxay wadarta guud ee hawlwadeenka hawlaha gargaarka ee Soomaaliya ka dhigaysaa ilaa 29 qof laga soo bilaabo bishii January.

20kii Oktoober, wuxuu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay Ban Ki-Moon soo saaray war-saxaafadeed uu ku cambaaraynayo rabshadaha ula kaca ah ee ka dhanka ah kuwa iyagu ku hawlan meel-marinta iyo xaqiijinta dadaallada lagu xakamaynayo dhibaatooyinka ilxaadaka leh ee haysta dadka tabaalaysan ee Soomaaliyeed. Wuxuuna ugu baaqay dhammaan dhinacyada kala duwan inay xurmeeyaan xaaladda dhex-dhexaadnimada aan dhanna u iilanayn ee ay ku hawlgalaan shaqaalaha samafalka, islamarkaana ay u oggolaadaan inay hawlgalkooda muhiimka ah ee ku wejahan taageerada lagu samata-bixinyo malaayiinta Soomaaliyeed ee taagta daran, kuwaasoo gargaarka caynkaas ah u arka isha keliya ee badbaabada noloshooda.

Hawlgalka maraakiinta dalka Canada ee galbinaysa shixnadaha maraakiibta ee WFP ayaa waxaa heshiiskoodu ku egyahay 20ka Oktober. Intii lagu guda jiray hawlgalka muddad sagaalka toddobaad ee heshiskaas, waxay ilaalinayeen toddobo markab oo siday ilaa wadar guud raashin dhan ilaa 44,800 metric tones oo Soomaaliya la gaarsiiyey. Toddobaadkan gudihiisana, waxay maraakibta ciidamada badda ee Boqortooyada dalka Netherlands (Holland) ku dhawaaqday inay hawlgalkooda labaad dib u bilaabi doonaan 23ka Oktoober. Waxaana la filayaa hawlgalka ilaalada dalka Holland inuu ku ekaan doono 10ka December.

WFP, ayaa iyaduna waxay ku dhawaaqday inay raashinka gurmadka deg-dega ah ee noocyada quudinta nafaqada sare leh ay Soomaaliya gaarsiin doonto, iyadoo xilligan si weyn loo saadaalinayo cabsi dheeraad ah oo la xiriirta xaaladda nafaqa-darrida ba'an ee ku sii badanaysa carruurta dalka. War-saxaafaded uu soo saaray 22kii Oktoober, Madax xafiiska hay'adda WFP Soomaaliya, Peter Goossens, ayaa shaaca ka qaaday “Cuntadan sida gaarka ah loogu talagaly nafa-qeynta waa mid aad qaali u ah, laakiin lacag kasta oo gasho waxay waxtar weyn u leedahay dadaalka ku wejahan badbaadad nolosha dadweynaha, labadaraadle, sicir-bararka qotatada-dheer ee imminka Soomaaliya ka jira.”. Tani waa markii ugu horraysay ee WFP ay adeegsato xaddi lixaad leh oo ka mid ah noocyada nafa-qaynta ee “Supplementary Plumpy” loo yaqaan. Waxaana la gaarsiin doonaa dhammaan xarumaha quudinta ee imminka jira, wadajirna uga wada hawlgeli doonaan hay'adaha caalamiga ah, kuwa heer qaran iyo kuwa maxalliga ah ee lixda bilood soo socda. Ilaa 20 Sahan oo la xiriira xaddiga qiyasta dhex-dhexaadkaah ee nafaqo-darrida, ayaa tilmaamaya in ka badan boqolkiiba 18%, kaasoo ka wanaagsan qiyaasta marxaladda bilowga gurmadka ee boqolkiiba 15%.

Gurmadka iyo Gaabiska Jira

Qiyaastii Celcelis ahaan ilaa lix bukaan ah oo cudurrada Shuban-biyoodka la xiriira(AWD) , ayaa laga soo sheegay maalintiiba in toddobaadkan laga helay Cisbitaalka Bossaso ee Puntland. Ilaa markii bukaanka koowaad la sheegay Bartamihii - September, waxaa wadarta guud ee bukaankaas ay gaaraysaa 261 qof (oo ay ka mjid yihiin 127 carruurta da'doodu ka yar tahay shan sano), kuwaasoo laga daweeyey dhibaatooyin cudurka shuban-biyoodka (AWD).

Waxaa toddobaadkan si baahsan looogu hawlgalay ka hortagga shuban-biyoodka(AWD). Hay'adda UNICEF oo kaashanaysa la-hawlgalayaasheeda, ayaa waxay bilowday hawlgallo isugu jira; ololaha wacyi-gelinta

Bulshada, dabagaka bukaanka qaba Shuban-biyoodka (AWD), daaweynta, nadiifinta biyaha la cabbo iyo ololayaasha faya-dhawrka biyaha qoyska iyadoo lala kaashanayo Duqa Magaalada Bossaso. Shirarka isku-duwidda ee dhammaan dhinacyada kala duwan ee hawlgalkani khuseeyo oo dib-loogu eegayo xaaladda shuban-biyoodka(AWD) ayaa la qabtay. Waxaana la is-weydaarsanayey waaya-aragnimada la xiriirta; duruustii laga bartay dhacdooyinkii hore, khariidaynta goobaha halista sare leh iyo waajibaadyada hawlgallada gaar ah ee loo xilsaaray guddi-hoosaadyada hawlgalka. Dhinaca Bartamaha/Kofurta Soomaaliya, waxay hay'adda UNICEF oo kaashanaysa hay'adda maxalliga ah ee aan dawliga ahayn ee SAACID, ay meel-mariyeen ololaha wacy-gelinta bulshada iyo daaweynta biyaha ee 13 tuulo oo ka tirsan gobolka Shabeelaha Dhexe.

Hay'adaha WFP iyo Golaha Qoxootiga Denmark(Danish Refugee Council), ayaa waxay noocyada raashinka isku-dhafan oo gaarayey ilaa 1,060 metric tons u qaybiyeen bulshooyinka saboolka ah ee magaalooyinka 16ka degmo ee Bossaso, Puntland,ayna ka faa'iidaysteen 50,000 qof. Intaas waxaa soo raaca ilaa 45,132 oo dadka bara-kacay ee Bossaso, iyagana isla toddobaaadkan gudihiisa loo qaybiyey noocyo cunto gargaar ah. Magaalada Marka, ayaa mar kale loo qaybiyey cunto gaaraysay ilaa 1,647 metric tons oo loogu talo galay ilaa 119,961 qof oo deegaankaas ku dhaqan. Magaalada Hargeysa ee Somaliland,ayaa waxaa iyadana la gaarsiiyey raashin dhan ilaa 28 metric tons oo ay ka faa'iidaysteen ilaa 1,560 qof.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia